

**Xaqqa u Yeelasho Kaalmada Lacageed Qaxootinamo**  
Refugee Cash Assistance Eligibility

**Go'aan Ogeysiin**

Macluamad shakhsi ahaaneed oo aad dhiibto waa loo isticmaali kara ujeedo muhiimaad labaad ah [Privacy Law, s. 15.04(1)(m), Wis. Stat]

Shaqaalaha Kayskaga imminka	Numbarka shaqaalaha	Deganka	Gobolka (hadii ey haboontahay)
Magaca Kayska		Numbarka Kayska	Numbarka telefoonka ( )
Taariikhda Ogeysiinta			

Magaca iyo Ciwanka Shaqadoonka

Ogeysiiskani wuxuu ka dhigan yahay in lagu wargeliyo codsigaaga ku saabsan Kaalmada Lacageed ee Qaxootinnimo (RCA) iyo/ama Kaalmada Daaweynta ee Qaxootinnimo (RMA) dib markii loo hubiyey waxaana la go'aansaday inaad xaq u leedahay waxyaabahan soo socda:

Kaalmada Lacageed ee Qaxootinimo (RCA)

Dib markaan u hubiney codsigaaga Kaalmada Lacageed ee Qaxootinimo waxaan ogaanney inaad xaq u leedahay kaalmo lacageed oo cadadeedu ku bilaabaneysa \$ \_\_\_\_\_ muddo \_\_\_\_\_ ah Taariikhda Codsiga la xereeyay ilaa Dhamaadka Bisha. Weey kuu soconeysaa kaalmada lacageed oo cadadeedu tahay \$ \_\_\_\_\_ iyadoo laga tixraacayo tirada \_\_\_\_\_ inta qof ee la kaalmeynayo. Fadlan ogow iney kaalmadani kaa istaagi karto barnaamijyo kaalmo oo aad xaq u yeelato darteet, daqli ama lacag ku soo gasha, haddaad ku guuldareysato qeyb galin dhaqdaqaqa mashruuca shaqagelinta, shaqo lagu siiyey haddad diido, ama haddad gaarto 8 bilood laga bilaabo taariikhda soo gashey. Haddii aad gaarto 8 da bilood kalmada xaq aad u leedahay, lacagta kuugu dambaysa.waxa laguu xisaabinayaa muddada kuu harsan.

Kaalmada Daaweynta ee Qaxootinimo (RMA)

Dib markaan u hubiney codsigaaga Kaalmada Daaweynta ee Qaxootinimo waxaan ogaanney inaad xaq u leedahay muddada ah taariikh \_\_\_\_\_ ilaa \_\_\_\_\_. Fadlan ogow si aad xaq ugu yeelato barnaamijyada kale ee kaalmada caafimaad waa in la codsadaa kahor intaan la gaarin 8 bilood laga bilaabo maalintaad gashay si looga hortago iney kugu dhacdo daryeel caafimaad la'aan.

Fadlan ku hagaaji wixii su'aalo ku saabsan Kaalmadada Lacageed ee Qaxootinnimo (RCA) iyo ama Kalmada Daaweynta ee Qaxootinimo (RMA) shaqaalaha kaalmadaada ee kor ku qoran. Haddaad u maleyso go'aankani inuu qalad yahay, ka wac numbarka telefoonka kor ku qoran shaqaalahaada kaalmada inu ku sharaxo.

Waa inaad 10 beri gudahooda ogeysiisaa shaqaalaha kaalmadaada wixii isbeddel ah sida shaqo ama haddii aad beddesho degaankaaga. Haddii aad ku guuldareysato inaad la socodsiiin natiijada waxy noqon kartaa in go'aan aan faa'iido kuu laheyn laga qaato caawinadaada.

Haddaad u baahan doonto turjubaan luqadeed, turjubaanka luqadda kuwa dhagoolka ah ama gargaar xagga naafada ama cuuryaanka, fadlan la xiriir shaqaalaha kaalmadaada ku shaqada leh.

**Xuquuqda Rafcaanka ama Abiilka:** Waxaad codsankartaa Dhageysii Caddaaladeed haddaad u maleyso go'aankani inuu qalad yahay, Tilmaanbixinta laxiriirta codsasho dhageeysi caddaaladed waxaa laga heli karaa shaqaalaha kaalmadaada, ama waxaad u dirikartaa codsasho qoran magacaga, ciwaankaaga, numbarka telefoonkaga, Lambarkaaga Amniga Bulshada (SSN), iyo sababta aad u codsaneeyso abiil qeybta Dhageeysiga iyo apiilka, u dir: P.O Box 7875, Madison WI 53707-7875. Haddad codsitid Dhageysi Cadaaladeed inta aan la gaarin taarikhda go'aankani, kaalmadaada wey ku soconeeysa. ilaa go'aan ugu danbeeyn laga gaaro. Kaalmadada kuma soconeeyso inta ka danbeysa mudada 8da bilood aad xaqa aad u leedahay. Haddi Dhegeeysiga Cadaaladeed muujiso in aadan xaq u laheeyn kaalmada, waa innad dib u celisaa kaalmada qaladka lagugu siiyey. Dhageeysi Cadaaladeed Waa inaad dirtaa 45 beri gudaheeda taarikhda ku qoran ogeeysiinka ama ogeysiinkaaga ma tixgelinaayo baaraha dhageeysiga codsashadaada.